



# Khayraadka Caafimaadka iyo Waxbarasho Badbaadada leh Xagaagan

Juun 27, 2022

Bulshada Qaaliga ah ee PPS:

Waxaan ku faraxsanahay in kiisaska COVID-19 ay hoos u dhacayaan Oregon; si kastaba ha ahaatee, waa inaan ka fojignaannaa maadaama uu fayrasku wali ku baahay gobolka oo dhan. Marka ay PPS isu diyaarinayso barnaamijyada xagaaga, waxaan rabnaa inaan ku xasuusino siyaabaha aad u ilaalin karto ardaydaada iyo qoyskaaga:

- Tallaalka COVID-19 - Ardayda da'doodu u dhaxayso 5-11 sano hadda waxay u qalmaan tallaalka xoojinta ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan halka laga helayo tallaalka ama tallaalka xoojintaada ee Oregon, [taabo halkan](#).
- Isticmaalka maaskaro ayaa weli ah qayb muhiim ah oo ka mid ah hababka.
- Buuxi [Liiska Hubinta Is-baaritaanka Jirrada](#) Maalinlaha ah ee ardaygaaga si aad u hubiso inay caafimaad qabaan si ay u xaadiraan barnaamijka xagaaga. Ardaygaagu waa inuu guriga joogo oo la xiriira bixiyaha caafimaadka haddii ay la kulmaan wax calaamado ah oo ku jira liiska hubinta.
- Ogeysii maamulaha goobtaada haddii ardaygaagu laga helay COVID-19.
- Ardayda ka diiwaangashan Summer Acceleration Academy (July 11-keeda ilaa Ogosto 5-teeda), PPS waxay sii wadi doontaa inay taageerto barnaamijyada [Baaritaanka COVID-19](#) ee lacag la'aan ah oo ay ku jiraan:
  - **Baaritaanka calaamadaha lagu garto** ee goobaha Summer Acceleration Academy halkaas oo kaaliyaha caafimaadka MESD ama kalkaalisada dugsiya uu joogo.
  - **Baaritaanka OHSU** ee ardayda PPS. Sanbal ayaa laga soo ururin doonaa [goobaha Summer Acceleration Academy](#) maalmaha Arbacada inta ay akadeemiyadu socoto. Fadlan hubi in sanbal ardaygaagu yaallo xafiiska [goobta Summer Acceleration Academy ee](#) la aqoonsaday inta u dhaxaysa 9 subaxnimo ila 11:30 subaxnimo.
- Goobaha soo socda ee Xarunta Caafimaadka Ardayga waxay ahaan doonaan kuwo u furnaan doona adeegyada caafimaadka inta lagu jiro xagaaga!
  - [Parkrose Xarunta Caafimaadka Ardayda](#) (12003 NE Shaver St) waxay furan tahay hadda ilaa Ogosto 26. Haddii aad qabto arrin caafimaad ama aad u baahan tahay inaad sii wado daryeelka, waxaad heli kartaa isla adeegyada lagu bixiyo sannad



dugsiyeedka. Tan waxaa ku jira baaritaanka COVID-19 iyo tallaalada, iyo tallaalka dugsiya.

- Warqadaha: [English/ Spanish](#), [Chinese](#), [Somali](#), [Russian](#), [Vietnamese](#)
- [Xarunta Caafimaadka ee Benson](#) (oo ku yaal Dugsiga Sare ee Benson @ Marshall, 3905 SE 91st Ave. ee Qolka A30) waxay furan tahay ballan ahaan oo keliya Talaadada iyo Khamiista galabnimada laga bilaawo 1:00 duhurnimo ila 5:00 galabnimo. Wac 503-418-0409 si aad ballan u qabsato. Ardeyda marka ugu horeysa ka helaya daryeelka caafimaadka Xarunta Caafimaadka ee Benson waxay u baahan doonaan inay iska diwaan geliyaan OHSU iyagoo waca 503-494-8505.
  - Warqadaha: [English](#), [Spanish](#)